Xuquuqda Waalidka/Qofka Ilmaha Masuulka ka ah

Hawlgalka Qoyska: Dimooqiraadiyad ahaan, waxaa waalidiinta ama dadka ilmaha ka masuulka ah lagu dhiirigelineyaa, laguna soo dhaweyneyaa inay ka qeybqaataan waxbarashadda rasmiga ah ee ilmahooda dhigta dugsiyada gaarka ah. Ka qeybgalka ay waalidiintu arrintaas si joogto ah uga qeybgalaan waxay ilmaha ka caawineysaa inay waxbarshadda ku guuleystaan. Marka hawlgalkaas ay si wadajir ah oo jaalnimo ku jirto ay u wada qabtaan guriga iyo dugsigu, waxaa ka faa'iideysaneya ardeyga, dugsiga, iyo jaaliyada.

Waalidiinta ama dadka ilmaha ka masuulka ah waxay xaq u leeyihiin in lagu daro habka ay waxbarashaddu u socoto, ayna fursad u helaan inay habkaas wax ka ogaadaan iyagoo carruurtooda meteleya. Xuquuqdaas ay waalidiintu leeyihiin waxay ku qoran tahay Qoddobka Sharciga Waxbarashadda ee ah 51101 waana sidatan soo socota:

Booqashada Fasalka: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay booqdaan fasalka uu ilmahoodu dhigto si ay u eegaan dhacdooyinka fasalka dhexdiisa ka dhacaya. Waa in marka hore dugsiga lala socodsiiyaa saacada iyo taariikhda uu waalidku fasalka soo booqaneyo.

La shirida Macallinka: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan in shir la yeeshaan macallinka ilmahooda ama maamulaha. Waalidiintu waa inay la xidhiidhaan dugsiga si wakhtiga iyo taarriikhda ay kulmeyaan oo labada dhinacba u habboon loogu qabto.

OO KOOBAN

Ka qeybgalka ay bilowgeba si joogto ah uga qeybgalaan waxbarashadda ilmahooda waxay muujisey inay ilmuhu waxabarashadda ku guuleytaan. San Diego City Schools waxay waalidiinta iyo dadka ilmaha masuulka ka ah ku dhiirigelineyaan inay waxbarashdda ilmahooda ka qeyb qaataan. Xuquuqda waalidka/qofka ilmaha masuulka ka ah wuxuu ku qeexan yahay Qoddobka Sharciga Waxbarashadda ee 51101.

Iska-wax-u-qabso ku shaqeyn: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay iska-wax-u-qabso kaga shaqeeyaan dugsiga uu ilmahoodu dhigto si ay wax uga qabtaan barnaamijyada dugsiga ka socda. Waalidiintu waa inay la xidhiidhaan dugsiga si ay u ogaadaan shuruudaha looga baahan yahay waxyaabaha ay iska-wax-u-qabsada kaga shaqeyneyaan.

Imaanshaha Ardeyga: Waalidiintu waxay mar kasta xaq u leeyihiin in lala socodsiiyo, haddii uu ilmahoodu dugsiga ka maqnaado fasax la'aan.

Imtixaamida Ardeyda: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in lala socodsiiyo sida uu ilamhoodu ku ahaa imtixaanada heerarka u dejisan iyo kan dawla-goboleedka laga qaado, iyo derajada uu dugsigu ka galey imtixaanadaas la qaadey. (Sharciga dawlad-goboleedyada qaarkood, waalidiintu waxay codsan karaan inuusan ilmahoodu ka qeybgelin imtixaanada ardeyda dawlad-goboleedka ku nool laga qaadeyo.)

Doorashada Dugsiga: Waalidiintu waxay ilmahooda u codsan karaan in lagu qoro dugsi kasta oo degmada ku yaal. Degmada khasab kuma aha inay codsigaas oggolaato.

Jawiga Nabadgelyada Dugsiga: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in loo xaqiiyo inuu ilmahoodu helayo jawi nabadgelyo iyo taageero waxbarashaba leh.

Qalabka Manhajka : Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay eegaan qalabka manhajka ee wax lagu baro fasalka ama fasalada uu ilmahoodu dhigto.

Horumarka Waxbarashadda Ardeyga: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in dugsigu uu la socodsiiyo horumarka waxbarasho ee uu ilmihiisu sameynayo, iyo cida lala xidhiidheyo haddii warbixin dheeraad ah ama taageero uu ilmuhu u baahdo.

Diiwaanada Ardeyda: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay arkaan diiwaanada ilmahooda. Haddii ay tuhmahan in wax khalad ah uu ku jiro ama xuquuqdii shakhsiyeed meel lagaga dhacay su'aalo ayey ka jeedsan karaan. Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in looga soo jawaabo wixii su'aalo ah ee ay dugsiyada waxbarashadda degmada u soo gudbiyaan.

Heerarka: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in la siiyo warbixinada ku saabsan heerarka waxbarasho ee ilmahooda laga fileyo inay gaadhaan.

Sharciyada Dugsiga: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in qoraal lagu soo ogeysiiyo sharciyada dugsiga, nidaamka imaanshaha, sharciga dharka dugsiga, iyo hababka booqashooyinka dugsiga.

Imtixaamida Cilmi-nafsiyeedka: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in la siiyo warbixinada ku saabsan dhammaan imtixaanaadka cilmi nafsiyeed ee lagu talo bixiyey in ilmahooda laga qaado.

Goleyaasha iyo Guddiyada: Waaliddintu waxay xaq u leeyihiin inay xubin ahaan uga qeybgalaan sida guddiga la-talinta waalidka, golaha aaga-dugsiga, ama kooxda hoggaanka maareynta aaga, taas oo waafaqsan qaynuunka iyo nidaamka u dejisan xubin ka ahaanshaha.

Bogga xiga eeg

shaqaalaha dugsiga, iyo ardeyda ay u wadaagi lahaayeen masuuliyadaha xaga caqilga, jidhka, shucuurta, horumarka bulshadeed iyo wanaaga ardeyda.

Nidaamkan waxaa ka mid ah, laakiin aan ku ekeyn:

1. Siyaabaha waalidka/dadka ilmaha masuulka ka ah iyo dugsigu ay ku caawin doonaan ardeyda si ay waxbarashadda iyo heerarka kaleba guul uga soo hoyin lahaayeen.

2. Siyaabaha uu dugsigu ku siin doono ardeyda manhaj iyo waxbarasho tayo sare leh, taas oo lagu siineyo jawi aad u wanaagsan dhammaan ardeyda dugsiga dhigata anfaca.

3. Waxyaabaha ay waalidiinta iyo dadka ilmaha ka masuulka ah ay ilmahooda u sameyn karaan si uu u helo jawi waxbarasho oo wanaagsan, waxaa ka mid ah laakiin aan ku ekeyn:

- Dabagal joogta ku sameyn imaanshaha ardeyga ee dugsiga
- Dabagal joogta ah ku sameyn dhammeystirka shaqada-guriga ee ardeyga loo soo direy
- Ku dhiirigelin ka qeybgalka dhacdooyinka manhajka ka baxsan
- Dabagal joogto ah iyo nidaam u dejin daawashada telefishinka
- Qorsheynta iyo ka qeybgalka dhacdooyinka guriga ee lagu taageerayo dhacdooyinka fasalka dhexdiisa lagu qabto
- Dugsiga iskaa-wax-u-qabso kaga shaqeyn
- Ka qeybgalka arrimaha ku saabsan go'aamada dugsiga

Qoddobka Sharciga Waxbarashadda ee 51101(c) wuxuu dhigeyaa: "Qeybtan looma fasiri ama macneyn karo inay dugsiyadu awood u leeyihiin inay waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah … ama u oggolaadaan in waalidka ama qofka masuulka ah u ka qeybgalo waxbarashada ilmihiisa, haddii arrintaasi ay ka hor imaaneyso xayiraad sharciyeysan oo maxkamadi ay ku soo ogtey inuusan agagaarka dugsiga iman karin ama soo booqan karin."

Waxbarashadda Dugsiga Sare Ka dambeysa

Ardeyda iyo waalidiintuba waxay xaq u leeyihiin in lagu wargeliyo shuruudaha kuleejada lagu galeyo. Waxaa aad muhim u ah in la garto siyaabaha lagu caawin karo ardeyda doorta inay waxbarashadda kuleejada sii wadato. Ardeyda iyo waalidiintuba waxay u baahan yihiin inay ogaadaan fasalada ay tahay in dugsiyada sare lagu qaato si loogu diyaargaroobo gelitaanka kuleejada Regents la yidhaahdo. Shuruudaha ugu yaryari wey kala duwan yihiin, waxayna ku xidhan yihiin hadba kuleejada iyo jaamacada uu ardeygu doorto. Shuruudaha "a-g" ee hoostan ku qoran waxaa soo diyaariyey Jaamacadda California, waxayna ka mid yihiin shuruudaha sida taxadarka leh ee loogu diyaargaroobeyo kuleejada:

a. Afarta sanno waa in sannad kasta xilli dugsiyeed kasta la qaataa xiisad af Ingiriisi ah.

b. Saddexda sanno waa in sannad kasta ee xilli dugsiyeedka kasta la qaataa xiisad xisaab ah, waxaana ka mid ah aljebrada, joometeriga iyo aljebrada dhexe. Afar sanno ayaa lagu talineyaa in la dhigto.

c. Laba sanno oo sheybaadhka saayniska ah. Waxaa lagu talineyaa sannad dheeraad ah ama in ka badan.

d. Laba sanno oo taariikha ah – cilmiga bulshada, waana inay ku jiraan dawlada Maraykanka, taariikhda dunida, dhaqanka iyo juqraafiga.

e. Laba sanno oo af isku mid ah oo aan ahayn af Ingiriisiga. Waxaa lagu talineyaa saddex sanno ama in ka badan in la dhigto.

f. Hal sanno oo muuqaalka iyo bandhigga farshaxanka ah.

g. Laba sanno oo ah korsooyinka la dooraneyo si loogu diyaargaroobo kuleejada, marka lagu daro kuwa loo baahan yahay ee "a-f" ee kore.

Si ay ardeydu oggolaanshaha kuleejada uga helaan, ardeydu waa inay guud ahaan galaan, soona gudbiyaan dhibcaha mid ka mid ah imtixaanada la kala yidhaahdo SAT-I ama Imtixaanka Kuleejada Maraykanka (the American College Test) (ACT). la-taliyaha dugsiga sare ee ilmahaaga ayaad ka heli kartaa taariikhaha la qaadeyo iyo goobaha lagu qaadayeba.